



**The Hon Peter Dutton MP**  
Wasiirka Socdaalka iyo Ilaalinta Xuudduuda

**WAR SAXAAFADEED**

23 April 2017

**1000 MAALMOOD OO XUDDUUDO XOOGGAN OO AMMAAN AH**

Hadda waxaa laga joogaa 1000 maalmood ilaa intii ay soo gaareen doonyaha dadka tahriibiya Australia iyo saddex sano oo laga joogo dhimashadii badda ugu dambaysey oo la og-yahay ee gacmaha tahriibiyeyaasha dadka.

Wasiirka Socdaalka iyo Ilaalinta Xuudduuda Peter Dutton wuxuu yiri Dowladda Australia waxaa ka go'an inay hubiso inay sidaas sii ahaato.

“Waxqabadkan wuxuu muujinayaa shaki la'aan in Isbahaysiga qorsheyaashiisa ilaalinta xuudduuda ee adag inay shaqaynayaan,” ayuu yiri Mr Dutton.

“Ka hor Howlgallada Xuuddudaha Qaraneed, Australia waxay aragtay wax ka badan 50,000 soogalootiga badda ee sharci-darrada ah iyo wax ka badan 800 doonyaha tahriibinta dadka, wax ka badan 8000 carruur ku jirta xabsiga ii-hayda iyo musiibo ka badan 1200 oo dhimashada badda ah.

“Howlgallada Xuuddudaha Qaraneed waxay keentay tahriibinta dadka ee badda inay joogsato waxay badbaadisey nololo aan xisaab lahayn. Guushaasi waxay Dowladda awoodsiisey inay ka bixiso dhammaan carruurta xabsiyada ii-hayda iyo inay xirto 17 tas-hiilaadka xabsiyada ii-hayda ah.

“Hase ahaatee guusheena jirta waxaan ognahay in halista tahriibinta dadku inay weli jirto,” ayuu yiri Mr Dutton.

“1000kii maalmood ee la soo dhaafay, Howlgallada Xuuddudaha Qaraneed waxay qabatay oo celisay 30 doonyaha tahriibinta dadka iyo in ka badan 765 dad ah kuwaas oo isku dayey inay Australia ku yimaadaan si sharci-darro ah.

“Tahriibeyaasha dadku waxay sameeyeen dhowr isku-day si ay hab uga helaan difaaceena, hase ahaatee mar kasta awooddeena ilaalinta xuudduuda ayaa ku guulaysatey inay joojiyaan.

“Awoodda Australia ay ku ogaato, qabato oo dib-u-celiso doonyaha tahriibinta dadka hadda way ka sii xoog badan tahay mar kasta.

“Tallaabadani waxay qadarin u tahay 16ka haya’daha Australia kuwaas oo gacan ka gaysta Howlgallada Xuddudaha Qaraneed iyo shaqaalaha howl-karada ah kuwaas oo maalin kasta ka shaqeeya inay ilkaaliyaan xudduudaha Australia.

“Waxaan kaloo doonayaa inaan ka mahad-celiyo waxqabadka iskaashatadeena caalamka ay ku sameeyeen kala-dhantaalidda iyo burburinta shabakadaha tahriibinta dadka ee dambiileyaasha ah.

“Australia iyo iskaashatadeeda gobolka waxay ka go’an xagga dadaalkeena inaan meesha ka saarno tahriibinta dadka ee gobolka ka jirta.

“Waa inaan hubinaa inaan wax dad ah lagu khiyaanin inay halis ku geliyaan naftooda doonyo aan ammaan ahayn iyo kharbudaada mustaqbalka dhaqaaleed ee qoyskooda ay u keenaan beenta tahriibiyaasha dadku.

“Dejinta Australia khayaar marna uma noqonayso cid kasta oo isku dayda inay ugu soo-socdaasho Australia si sharci darro ah doon. Cid laga reebayo ma jirto.”

**Wixii macluumaad dheeraad ah: Xafiiska Wasiirka Dutton – 02 6277 7860**